

DAKHLIGA KABIDDA MUJTAMACA (SSI)

Waa maxay Dakhliga kabidda Mujtamaca?

Dakhliga kabidda mujtamaca oo loo yaqaan SSI, wuxuu kuu suurta gelinayaa inaad hesho lacag Cash ah si aad ugu iibsato waxyaabaha lagama maarmaanka ah sida:- Cuntada, dharka, iyo inaad isaga bixiso ijaarka guriga.

Prograamyada waxaa mar mar ay dadku ugu yeeraan Social Security- Caymiska Mujtamaca.

Ma heli karaa SSI ? Caymiska Mujtamaca.

Waad heli kartaa SSI haddii dhaqaalaha ku soo gala uu yar yahay aadna ka mid tahay dadkan hoos ku qoran.

- Aad tahay 65 jir amaba ka weyn;
- Indhoole ah; ama
- Aad tahay naafo (Curyaan) micnaheedu aad tahay ruux si dhab ah naafo u ah, mid jirka ah amaba mid maskaxiyan ah oo aadan qaban kari shaqo buuxda (full time) ugu yaraan 12 bilood.

Haddii si sharci ah aad ku joogto Mareekanka, waxaad heli kartaa SSI, haddii aad tahay ruux da'diisu weyn tahay amaba naafo ah (curyaan) kharashka ku soo galaana uu yaryahay.

MUCAAWINADA GUUD (GENERAL ASSISTANCE) GA.

Waa maxay Mucaawinada Guud (General Assistance)?

Mucaawinada Guud, oo loo yaqaan GA, waxaa bixiya tuulooyink magaalooyinka sida Portland iyo Lewiston si ay macamiishaan uga bixiyaan kharashka Guryaha iyo waxyaabaha aasaasiga ah ah.

Ma heli karaa mucaawinada guud? (GA)

Waad heli kartaa mucaawinada guud haddii aadan heli Karin kharash kugu filan iyo baahida aasaasiga ah iyo in la arko in aad u qalantid barnaamijka, sharcigana uu kuu oggolaado.

Haddii aad si sharci ah aad ugu nooshahay Mareekanka, oo aad fulisho sharciga u yaal prograamka, wad heli kartaa mucaawinada guud.

Wixii su'aal ah oo ku saabsan parnaamijkan fadlan la xariir:

Somali Culture and Development Association.

Tel: 207-233-6014

Email address: somaliculture2000@hotmail.com

Maine Equal Justice Partners

Tel: 207- 626-7058 ama 1-866-626-7059

Email address: www.mejp.org